Gudniinka Haweenka

Waa maxay Gudniinka Haweenku?

Gudniinka Haweenku (Female Genital Mutilation) (FGM), oo mararka qaar si qalad ah loogu tilmaamo Xalaalaynta Haweenka (Female Circumcision), waxuu Ururka Caafimaadka Caalamku (World Health Organisation) (WHO) ku qayaxay in uu ka mid yahay hawlaha ka kooban “saarista qayb ahaan ama gebi ahaan ee saxaaxa dibadda yaalla ee haweenka ama dhaawac kaloo loo geysto xubnaha saxaaxa ee haweenka sababtu ha noqoto mid dhaqameed ama mid kaloo aan daawayn ahayn”.

FGM waxuu u kala baxaa afar nooc. Noocyada 1aad iyo 2aad waxay ka kooban yihiin jarista kintirka iyo faruurta yar waana noocyada ugu badan ee FGM. Nooca 3aad waxuu ka kooban yihiin xiritaanka markaasoo kintirka iyo faruurta yar la wada saaro oo afka siilka la isku tolo ama la yareeyo halkaasoo lagu dhaafo dalool yar (1 – 2 cm) si ay kaadida iyo dhiigga caadadu u soo maraan. Nooca 4aad waxuu ka kooban yihiin hawlaha kaloo dhan xataa muditaanka ama daloolinta kintirka, solidda iyadoo la gubo kintirka iyo xubnaha hareera yaalla ama siilka oo la geliyo walaxyo dhammaynaya.

Waxaa kuwaas ka dhasha dhibaatooyin aad u daran, xagga cilmi nafsiyeedka iyo shucuurta labadaba dhibaatooyinka caafimaadkana waxaa ka mid ah xanuun weyn, argagax, jeermis dhasha, dhiig bax, ma-dhalaysnimo, xajin la’aanta kaadida, fayruska HIV iyo dhimasho.

Waxaa lagu qiyaasayaa in ku dhawaad 138 milyan oo haween Afrikaan ahi ay soo mareen FGM caalamka, iyadoo kuwaas ilaa boqolkiiba 80 (80%) ay soo mareen nooca 1aad ama nooca 2aad.

Waxaa hawsha, inta ugu badan qabata haweenay da’ weyn oo aan tababbar caafimaad lahayn. Suuxiyeyaasha dhif ayaa loo isticmaalaa, caadadaasna waxaa lagu sameeyaa iyadoo la isticmaalayo qalab aasaasi ah sida mindiyo, maqasyo, jabka quraarad iyo makiinadaha garka. Badi saliid-naar ama geedo la isku qasay ayaa boogta la saaraa si siilka afkiisa loo adkeeyo looguna joojiyo dhiigga.

Waxaa FGM caadi ahaan lagu sameeyaa gabdhaha da’doodu u dhexeyso 4 ilaa 15, inkastoo mararka qaar lagu sameeyo dhallaanka cusub ilaa haweenka dhallinyarada ah ka hor guurkooda.

Halkee FGM lagu qabtaa?

Inta ugu badan waxaa FGM lagu qabtaa, ama asal u ah, bulshooyinka 28 dal oo Afrikaan ah. Waddamada qaarkood sida Masar, Itoobiya, Soomaaliya iyo Suudaan, heerka baahsanaanta waxaa loo maleeyaa in uu gaarsiisan yahay boqolkiiba 98 waddamo kalena sida Naygiiriya, Kiiniya, Togo iyo Senegal, heerka baahsanaantu waxuu u dhexeeyaa boqolkiiba 20-50.
Waxaa kaloo FGM lagu qabtaa qaybo ka mid ah Gacanka Carbeed (Arabian Peninsula) sida Yaman iyo Cummaan iyo Yuhuudda Itoobiya ee Falaashada, kuwaasoo qaarkood ay dhawaan degeen Israa'iil. Waxaa kaloo la soo sheegay in FGM ay ku dhaqmaan shacabka Muslimiinta ah ee qaybo ka mid ah Malaysiya, Baakistaan, Induniisiya iyo Filibbiin.

Haajiraadda iyo socdaalka qaxootida awgood, waxaa FGM iminka ku dhaqma shacabka jinsiyadaha laga tira badan yahay ee qaybaha kale ee adduunka, sida Maraykanka, Kanada, Yurub, Australiya iyo New Zealand.

Waxaa lagu qiyaasayaa in tirada gabdhaha halis ugu jira FGM ay gaarsiisan yihiin 6000 sanadkii Ingiriiska dhexdiisa.

Maxaa FGM loogu dhaqmaa?

FGM ma aha habdhaqan neceyb loola jeedo. Waxaa loo sameeyaa maadaama ay waalidkoodu aamminsan yihiin in ay tahay danta gabdhahooda. Bulshooyinka ay raggu waayeelka u yihiin ee FGM sameeya qaarkood waxay u arkaan in, guurku, uu lagama maarmaan u yahay sharafta iyo nolosha haweeneyda. Haweeneyada aanan soo marin FGM ma filan karto in la guursado bulshadeeduna ma soo dhawayn doonto. Waxaa caadada badi loo qabtaa iyadoo la aamminsan yahay in ay tahay wax sifeeye ah oo lagu hubiyo in ay haweeneydo nadiif tahay.

Bulshooyin badan oo ku dhaqma FGM ayaa Muslin ah diinta ayaana badi lagu sheegaa sababta taas loo sameeyo, inkastoo Quraanka ama casharrada kalee diintu ayan dhigin in FGM la sameeyo. Sidoo kale, waxaa weliba FGM ku dhaqma Kiristanka ka soo jeeda Kanisadda Kobtigga loo yaqaan ee waddamada ay Masar ka mid tahay.

Sharciga Ingiriiska dhexdiisa

Wixii hawl FGM ah ee lagu sameeyo haweeney ama gabadh waa sharci darro sida uu dhigayo Sharciga Gudniinka Haweenka khuseeya ee 2003dii soo baxay (Female Genital Mutilation Act 2003). Waxaa weliba gaf dembi ah sida uu Sharcigu dhigayo in muwaadiniinta Ingiriiska ama degganeyaasha joogtada ahi ay dalka dibaddiisa ku soo sameeyaan FGM, ama ay gacan ka geystaan, gargaaraan, ku taliyaan ama

fududeeyaan qabashada FGM ee dalka dibaddiisa, xataa waddamada ay caadadu sharciga ku tahay dhexdooda.

Maxaad samayn kartaa haddii aad ka shakisan tahay in ay gabadhi halis ugu jirto FGM?

Waxaa FGM caadi ahaan lagu sameeyaa waddamada laga soo jeedo. Waxaa jira siyaabo farabadan oo looga shakiyi karo in ilme loo diyaarinayo in dalka dibaddiisa looga sameeyo FGM. Waxaa kuwaas ka mid ah ogaanshaha in uu qoysku ka mid yahay bulsho ku dhaqanta FGM ayna isku diyaarinayaan in ay ilmaha fasax u kexeeyaan, iyagoo tallaallo u qaban qaabinaya ama u qorshaynaya ka maqnaanshaha dugsiga, waxayna ilmuhu soo hadal qaadi kartaa “hawl gaar ah” oo la qabanayo.

Calaamadaha suurogalka FGM la soo sameeyey waxaa ka mid ah:
Muddo dheer oo laga maqnaado dugsiga iyadoo soo noqodka isbeddel muuqda oo ku yimaddo habdhaqanka ama waqtiyo badan oo la joojiyo casharrada ama waxqabadyada caadiga ah, iyadoo ay suurogal tahay in la arko dhibaatooyin xagga kaadi haynta ama caadada ka yimaadda.

Haddii aad ka shakisan tahay in ay gabadhi halis ugu jirto in lagu sameeyo nooc kastoo FGM ah, ku dhaqaaq in aad islamarkaaba ka soo warbixiso! Waqtigu waa qaali markaas fadlan wax ka qabo islamarka aad ka shakido in ay gabadhi halis ugu jiri karto FGM, tilmaamaha hoose ayaa kuu sheegaya waxa aad samaynayso.

Si aad gabadh uga badbaadiso FGM samee waxqabadyada soo socda:

- Waa in aad ka wargeliso La taliyaha kuu xilsaaran ee badbaadinta carruurta
- Waa in uu qofkaasi gudbin u diro waaxda Daryeelka Bulsheed ee Carruurta (Children’s Social Care) ee Dawladda Hoose (Local Authority)
- Mararka degdegga ah si toos ah ula xiriir Daryeelka Bulsheed ee Carruurta, ama Booliiska xaafadda

Haddii aad ogaato ama aad ka shakido in gabadh hore loo soo mariyey FGM, ha is odhan wax kama qaban kartid. Waxay u baahnaan doontaa daryeel takhasus leh iyo

taageero haddiina ay gabdho walaalo yihiin waxay iyagu u baahan doonaan in taasoo kale laga badbaadiyo.

Magaacda 'caadada' 'dhaqanka' 'diinta' ama cabsida in 'midab kala sooce' lagugu tilmaamo yaanay waxaasi kaa horjoogsanin in aad tallaabo ka qaaddo badbaadinta gabdhaha halis ugu jira FGM, waxaa sidaas loogu xadgudbayaa xuquuqda aadamaha waxuuna ka mid yahay xadugudubka carruurta loo geysto.